XARUNTA DHAQANKA IYO
SUUGAANTA FAARAX SHUURIYE

AXMED GINDHISH
1810-1897

CABDALLA QAASIM DAAMEY

AXMED GINDHISH (1810-1897)

S o o y a a l iyo s u u g a a n

Cabdalla Qaasim Daamey

Dhigaal koobahan waxaa soo saaray isla markaana tifaftir iyo turxaan bixin ku sameeyay xarunta dhaqanka iyo suugaanta Faarax Shuuriye oo ah xarun u taagan kobcinta hiddaha, dhaqanka iyo suugaanta Soomaaliyeed.

Xaquuqda lahaanshiyo ee dhigmadan waa mid xafidan. Lama daabacan karo guud ahaan ama qayb ka mid ah, sida aan loogu guurin karin jaadadka habab danabeedka, iyadoon oggolaansho laga helin qoraha. **daamey044@gmail.com**

@2024, Xaafadda Horseed, Dhuusamareeb, Galgaduud, Soomaaliya.

SOOYAAL NOLOLEED

AUN Abwaan Axmed Mahdi Aadan oo loo garan ogaa Axmed Gindhish wuxuu ahaa maansoruug, waayo arag iyo nabad goobe uu magaciisu gudbanaa boqolleydii 19aad. Kolka laga yimaado abwaan Cabdulle Faarax Cadow (Cabdulle Guure) oo isagu ahaa la loodi waagii looga haray suugaanta dabayaaqadii qarnigii 18aad iyo horraantii qarnigii 19aad, wuxuu Axmed Gindhish ahaa suugaanyahankii soo labeeyey ee ugu magaca durugsanaa dhulkii Ceelbuur, Ximan, Ceelgaab teer iyo Gallaadi.

Axmed Gindhish waxaa la qiyaasaa inuu dhashay 1810ki waxaa se hubanti loo hayaa geeridiisu inay ahayd 1897ki sida ay hubiyaan badi sooyaal haya-yaalku. Haybta wuxuu ahaa Murusade wuxuuna kasoo jeeday qoys gayiga kaga tilmaannaa dhaqan, hoggaan iyo diin. Waxa uu la walaal ahaa waligii laga duco began jiray tuftiisuna ka sheegganeyd Ceelbuur ee loo yaqiin Cabdi Mahdi Aadan (Cabdi Shariif). Axmed Gindhish waxa uu saddex fac la aqallo ahaa gabarna uu ka qabay abtiyaashii Marreexaan oo Ceelgaab fadhiyey.

Ka sokow inuu gayiga haatan loo yaqaan Gobollada Dhexe uu ka ahaa hoggaamiye laga talo qaato iyo nabad raadiye u ergan isu dumidda Soomaalida waxa uu misana Axmed Gindhish reerkiisa Murusade u ahaa hoggaamiye dhaqameed la milgeeyo iyo abwaan eraygiisa la dhowro.

Ka gadaal geeridiisi, waxaa xilkii hoggaan dhaqan iyo tol isku heyn ka dhaxlay wiilkiisi Sheekh Cabdikariin Axmed Gindhish (1880-1950). Sheikh Cabdikariin ayaa horraantii boqolleydii 20aad ahaa hoggaamiye dhaqameed laga maamuuso gayiga Ceelbuur iyo guud ahaan Gobollada Dhexe.

Gabi suugaantii laga guntay abwaan Axmed Gindhish ayaa noqotay mid cidlo ku qubatay oo aan lagu sameyn ururin, kaydin iyo dhigaal togan oo lagaga gungaar, tiiyoo ay dayaca iyo hilmaanka kala sinneyd suugaantii bartamaha iyo koofurta Soomaaliya oo la oran karo in ay badi dabeyshatay ka gadaal markii ay eersatay daneyn la'aanta dadkeedii iyo gacan

bidixeyntii dowladihii soo maray dalka gaar ahaan middii kacaanka oo ku sifowday degaameynta iyo reereynta olo-olihii dib u ururinta suugaanta Soomaaliyeed.

SUUGAANTII AXMED GINDHISH

GABAYGII: JAHANAMO KA AADAAN

Tagtadii hore waxa ay dadku lahaan jireen cibaarooyin badi suulay oo warin mooyee aan marag lagu arki kareyn samankan, waxaa gabbal u dunkaasi ka mid ahaa af ku-leebnimadii iyo ishaartii ay gaarka u lahaan jireen wadaadada kutubba qaadka ah iyo abwaannada maanso ruugyada ahi.

Waxaa la wariyaa in xilli lagu hilaadiyo 1850ki nin booli cun ahaa oo geel qaadnimo kaga astoobay Ceelgaab tan iyo Gallaadi uu kaxeystay hal fir iyo summad leh oo Marreexaan kaga wada marag ahaa in uu lahaa caana nuuggoodi Axmed Mahdi Aadan (Axmed Gindhish). In geel la qaadaahi ugub ma aysan ahayn balse in loo dhowaado summad caano nuug iyo sameyn culimo ayaa ahayd lama arkaan laga anfariiro.

Carriga wixii caaqil joogay ayaa ku baxay booli cunkii bal inuu sarriigto oo uu soo celiyo hashii Axmed Gindhish, si waliba oo loogu galliimay, ergo ugu baryo fariisatay, nabadna wax looga doonay, waxaa kolna ninkii lagaga caal waayey soo celinta hashii Axmed Gindhish iyo u ceeb qarinta tolweynihii uu inanka iyo inan la-yaalkaba u ahaa ee Marreexaan.

Berigii xigay ayey gar iyo geed kulmeen reerkii uu booli cunku ka dhashay iyo reerkii abtiyaalka u ahaa Axmed Gindhish gabadhana uu ka qabay. Geedka iyo golaha waa loo dhammaa geesahana waxaa ka daaqayey fardihii uu raggu watay, waxaa goobta wax ka fadhiyey ninkii boolida qaaday, ergada filqay, eedduna ay dusha ka saarreyd.

Ged walba oo garta iyo hadalka loo rogo ninkii ayaa ka gar qaadasho diiday garcadaalihii isu yimid. Kol haddii uu qudhiisu xigto dhow ahaa oo aan gacan loo qaadi karin, kol haddii uu Gindhish isna ahaa inan la-yaal abti loo yahay oo aan la samirsiin kareyn, duqeydii ayaa dhanna u geddin waayeen gartii loo madlanaa goynteeda.

Kol haddii ay talo caddaatay waxa ay odayadii ugu dambeyn arrin ku gooyeen ku tufidda carrabka Axmed Gindhish waxa ayna ku yiraahdeen: "Kuu weynay hashii lagaa qaaday, in aan isku le'anana waan ka baqnay, caano nuugna waad tahay, nin culimo ahna waad tahay, carrabkaagana waan ku tufnay ee ninka Asmeey oo burhaantaada la tiigso".

Marba haddii arrin isaga loo daayey waxa uu Axmed Gindhish iska taagay geedkii loo dhammaa waxa uuna mariyey gabaygan ku astoobay mid ka mid ah suugaan inkaareedkii durba loo aqblay ee ay Soomaalidu la dhakafaartay, waxa uuna yiri:

Afar iyo tobanka boqolka, bisinnadii ahaayow
Axad iyo isniin iyo, talaadadi lagu ekeeyaay
Arbaciyo khamiis, sumacyadii uur ku jirayow

Awal iyo aakhir, ama ururshe Yaasiin ahow
Ancaamkii isna, meel haddii lagu abbaarow
Haddaan ahay abka culimo, nimay wada ishaareen

Asaan ahay nimaan af-naqaneyn, eraygiisa dabadii
Haddii anan abaadsheyn, naagaha ajnabigaa
Haddii anan ka aalleyn, ragna soo aloogmiddii[1]

Haddii anan ilwaadeyn, ashahaadku waa beri
Ninka aano iga galay, ama ani i saraaroow
Awrta iyo aarankaba, ninkii iga awryaadow
Intaan axadi soo gelin, idam alle laguu ooy

Duunyadaada kii ugu itaal roon, agaskaaga laga yeel
Aakhiro kolkaad aaddana, jahanamo ka aadaan

[1] Arbush, dagaal

Maalinta la joogaahi waxay ahayd Sebdi, raggu wuxuu dhabannada la wada qabsaday gabay inkaareedka la wada dhowrayey burhaantiisa. In yar dabadeed, bidhaan fog ayaa laga arkay siigo soo bulbul leh "war waa col, col baa na soo galay" ayaa lagu wada qayliyey.

Ninkii qaaday hashii Axmed Gindish oo aan markii horeba ka degin faraskiisa ayaa durba la booday jarihii faraska waxa uuna qummaati u aaday colka la maleeyey ee soo siigo iyo bus kicinaya, haddii la eegay waaba col dhab ah iyo dab-wadaag la dhowrayey gulufkooda.

Hootadi horeba waxa ay fallaarti ay colku soo ganeen wadnaha kala baxday ninkii isku gingimay colka horayna booli cunka u ahaa, colkii gulufka ahaa oo mooday in loo diyaar garoobay ayaa raadkoodii ku laabtay iyaga oo aan waxba hubsanin ayayna gaddoomeen. Raacdo dabadeed, waxaa la hubsaday in ay fogaadeen colkii duullanka ahaa, raggu hadduu is eegay isna tiriyey halka nin ee ay ka dabeyshatay ruuxdi wuxuu noqday ninkii uu inkaaray Axmed Gindhish ee boolida ku heystay hashiisi.
Gabbalkii oo aan waaga dhicin ayaa waxaa sida la sheego isi soo taagay rati uu ninku lahaa xoolihiisana uu ugu jeclaa oo sida la sheego ku maqnaa aroor, ratigii ayaana looga dhigay

agas iyo dug oo halkii ayaa lagu bireeyey. Habeenkaa oo ay sii baxeysay Sebdi waxaa ninkii la dhigay iilka oo dunida kumu uusan gaarin Axad, duunyo neefkii uu u jeclaana waxaa looga dhigay duug, sidii uu ugu inkaaray Axmed Gindhish.

Intaan axadi soo gelin, idam alle laguu ooy
Duunyadaada kii ugu itaal roon, agaskaaga laga yeel

kol haddii uu degdeg u haleelay eraygii iyo inkaarkii Axmed Gindhish waxaa daarta dambe ee aakhirana loo rajeeyey rarankii naareed ee uu Gindhish ku inkaaray, naartii laga magangeli jiray Ilaahey.

Aakhiro kolkaad aaddana, jahanamo ka aadaan

Waxaa waayadaa gayiga hadal qaaday gabaygii inkaarta ahaa ee durba samada laga aqbalay iyo burhaanta asmadii abwaan Axmed Gindhish oo ay carrabkiisa ku tufeen abtiyaashii.

GABAYGII: MAANDHOOYINOW HEE

Ka gadaal dirirtii Boodboode-Arille oo lagu hilaadiyo 1780ki, Sida la wariyo waxa ay qabiilka Cayr heleen boqol sano oo nabad ah oo aano mooyee aysan dhexdooda is argoofin. Haddaba Hilaadda 1880ki, nin Murusade ahaa ase caano nuug iyo inan la-yaal intaba u ahaa jilibka Habar-aji ee Cayr ayaa waxaa waran loo iilay oofka ku jaray reer Ayaanle Cayr. Kol haddii loo gogol dhigtay waxaa sida la wariyo reer Ayaanle ka soo yeeray xifaalo tiri "Waraabe mooyee aadane indhaha ma aynaan saarin". Arrinkaa oo ay dafiraad kaga dhigayeen miisidda magta ninkii Murusade.

Habar-aji waxa ay tashi dabadeed kolkooda nafta dhaafiyeen nin sooyaal haya-yaalka qaar ay magaciisa ku sheegaan Ina-Sangooyo oo Marreexaan ahaa ase caano nuug iyo inan la-yaalba u ahaa reer Ayaanle, kolkii loo soo geed fariistay waxa ay Habar-aji markoodi ku kalaameen xifaalo tiri "Dawaco mooyee qofba ma aynaan qur jarin". Taasi oo ay warcelin kaga dhigeen xifaaladii hore kuna dafireen magta ninkii Marreexaan.

Waa dab uu Iblays afuufayo'e, reer Ayaanle waxa ay hal galab birta ku boobeen sagaal wiil oo qooruhu ka quluc leeyihiin kuwaa oo carraabinayey Lo'adii Habar-aji. Dhulka wixii dad joogay ayaa la anfariiray eelka dhacay, horay looma-arag ayeyna ku noqotay cirroolihii carriga ka talin jiray.

Wixii la raadiyaba, dawo ayaa la waayey waxaana ugu dambeynti la doonay Axmed Mahdi Aadan (Axmed Gindhish) oo berigaa ahaa oday laga talo beegto iyo abwaan carriga ka sheegganaa, kol hadduu qudhiisu xigtonimo iyo waayo aragnimo kulansaday ayuu geedkii yimid waxaana gogoshii looga guntay erayadan dab daminta iyo digniintaba lahaa, wuxuuna yiri:

Xalay baan babay
Misna waan babay
Gogoshaan ka baxay

Dhulkaan meel ka beertay
Samadaan kor u beegay
Wax baa iiga bidhaamay

Waa balaayiyo khayr
Beder bay ku jireen
Waana is buubsanayeen

Mid baa soo badi doonta
Barbarkaas iyo bidixda
Yaa baldhaarkeedu ahaa

Kolba waa beladiiye
Sharteedii in la baajo
Ilaahey mawga baryaa
Oo maw baahantihiin?

Waxa uu bidhaamiyey in ay balaayo soo fool leedahay oo ay colaadi rimantahay, horay waxaa looga wada marag ahaa inuu Axmed Gindhish yahay kuhaanlow aan burhaan yarayn oo beri sii horreysay oo lagu hilaadiyo 1864ki ayey ahayd kolkii sida la sheego ay butaacday burhaantii uu ishaaray ee ku jirtay gabaygiisii gudbanaa ase aan dib loo helin ee **Golawley**. Tuducyadii Galawley ee xilligaa laga guntay Axmed Gindhish ayuu ku ishaaray in ceel macaan laga heli doono Galhareeri oo aan xilligaa kahor la degin, wuxuuna yiri:

Galhareeri ceel laga qoday, oo godo ka riimeyso
Oo maalku gaawyaha fadhiyo, yaa galawfgu ii sheegay

Haddii Galhareeri la qoday ayaa la sheegaa in laga helay ceel macaan oo ay kolkii dambe magaaladu ka asaasantay, sida waayeelka laga wariyo waxa ay ishaartiisu ahayd mid aan la dhayalsan, hubanti se waa Eebbe mooyee in aysan cid kale timaadada ka war heyn.

Kol haddii uu Cayr uga digay balaayo soo fool leh, iyagu talo waa ay ka diideen oo "Maya" ayaa la yiri, labadii reer ee Ayaanle iyo Habar-aji midna mag baa laga waayey midna inay ka samraan sagaalkoodi wiil.

Nin geedki fadhiyey ase aanan ayihiisa sooyaal goobka ku helin, sida muuqata se Ayaanle ahaa ayaa laga sheegay: "Godobta saddex baa ka talin karta, nin waa Maxamed Qaylshe oo Habar-aji ah oo sagaal qoora madoobe ayaa ka maqan kamana samri karo lana siin maayo, ninna waa aniga oo haddii aan bixiyo sagaal boqol oo halaad sagaal boqol baa gaajo iiga baqtineysa, ninna waa Cawaale Afrax Yabaal oo yabadhaalo ah isaguna in ay tolku isku ba'aan ayuu rabaa oo wax iyaga la egi ay ka soo haraan"

Cawaale Afrax Yabaal ayaa gartii ka maansooday, waxa uu farta danqiyey boogtii tuhun ee ahayd inuu labada jilib isku jebinayo, waxaa isna waagaas laga guntay inuu yiri:

Allow saymo soo doogtay
Sacabbo laguma dadi karo

Ilaahow sagaalkii ninna
Subax lama idlayn karo
Sed yar oo la kala qaatiyo
Calaw-samir ma la arkaa!

Gari alle ayey taqaan'e galabkaas dhanna waa ay diidday, col la isku soo dumi doono iyo warmo la is dari doono ayey filashadu ahayd.

Axmed Gindhish oo aan xigtadiisa ka quusan ayaa markale suugaan butaacay oo waxa uu mariyey gabaygii caanka baxay ee ***MAANDHOOYINOW HEE***, waxa uu Cayr u tusaaleeyey halisaha ku xeeran, kol ay tahay Miniliggii 2baad oo gulufkiisu uu Harar soo kabiixayey iyo xabashi oo duullankeeda la filayey iyo kol ay tahay Keenadiid oo berigaa Hobyo degay aabina loogu taag waayey. Kolba dhan ayuu Cayr ka tusiyey hardankii jiray iyo hoyaad waagii dunida ka taagnaa, waxa uu uga digay in ay is dooxaan iyaga oo col kale hareeraha ka xigo waxa uuna mariyey gabaygan hoos ku xusan:

Minankiina haddaad nin u heshaanba, adu un heerteene[2]
Haddaad boqol halaad haamisaan[3], adun ham siiseene
Haruubkaad dhanteen, waxaa ekayd inad hambeysaane

Sagaalkii nimee hogobka tiil, waa Hiraab go'aye
Haad uma ekeyn, wiilashii halabta dheeraaye
Sidii Haramcas yaad wada cunteen, hororadiiniiye

Ninkii lagu hiloobaba, naftaad hirig ka siiseene
Hadhow yaa Mareeg waxa la dhigan, haanan jiirsmahe
Maandhooyinow hee, naftaan haayiddeed[4] go'ine

[2] Goyn, dil

[3] Laxaw

[4] ajasheeda

Halna ma ogodiin oo indhahaad ka hambabaawdiine
Handabab yaad u taalliin, dhaayaha hal ugama jeeddaane
Sidii hamajul-hamaj yaad dab shidan, hamag tiraahdaane

Horseed waxaw ahaa, faranjigii mowdku ku hinlaaye[5]
Amxaaruu wuxuu hanti lahaa, haadda gabalkeede
Maandhooyinow hee, naftaan haayiddeed go'ine

War geeri hadduu hulkumo, ee karkuba hoos u dami waayo
Wuxuu ku hakadaa, waa tagoog hilif[6] *ku yaallaaye*
"Hoo" baa u dhaxasha, wixii wax lagu hagaajaaye

Xaggaa Adari[7] *gaal hoor leh, yaa hoday islaankiiye*

---

[5] habboonaa

[6] Duug, agas

Haarweyn dariiqadii kasoo didday, waa lasoo huwaye
Maandhooyinow hee, naftaan haayiddeed go'ine

Hobyo Keenadiid baa degay, oon laga haruufeyne
Haweenkiisi bay ula mid yihiin, Hiirajiroo idil'e
Daarood Hawiyuu wuxuu rabaa, inuu hug siiyaaye

Harti iyo Hintire wuxuu rabaa, inuu hoggaanshaaye
Hiishooda meeshaa ka kaca, nimanku waa halise
Waa laysku haararahayaa, oo waxbaan naloo harine

[7] Harar

"Maya" ayaa la yiri mar kale. Habar-aji guluf mooyee gaabsi laga waay oo nin u taliyey ayaa laga sheegay "wax aad u aaydaan ubadkiinnu se eedo miyaan idiinku taliyaa mise wax aad eeddaan ubadkiinnu se u aayo?" Tan dambe ayeyna doorteen.

Reer Ayaanle iyaga sagaal boqol oo halaad soo sooci diide, dirir ayaa la isu la tegey waxaana sooyaal warisku tabiyaa in gulufkaas dambe ay ku naf waayeen saddex boqol oo rag ah, arligana waxaa qubtay dhiig aan horteed iyo dabadeed toona daadan ase iskii u istaagay dibna loogu aayey eraya suugaaneedkii uu Axmed Gindhish kaga digayey timaadada.

GEERAARKII: DARMAAN

Boqolleydii 19aad iyo wixi loo soo gaaray bartamihi middii 20aad waxaa dhaqan gobeedka Soomaalida dhextaal u ahaa xarragada fardaha. Ka sokow colaadda iyo baratanka waxa ay farduhu xarrago-fuul u ahaan jireen nin doorka sheeggan iyo ugaasyada loogu caano shubo dhaqan xajinta. Dhulka loo gaaro Ceelbuur iyo hareerihiisa oo ah dhul cadduun ah oo uu Eebbe ku galladay ilo maaxda iyo biya-baxo harraad moog ah ayaa ahaa dhul ku wanaagsan dhaqashada fardaha oo haatanba uu gabal baaqi ku sii yahay.
Ka sokow Suugaanta fardaha waxaa misna Ceelbuur uu gayiga Soomaalida dheeraa tiraabtii laga guntay banbaxyadii farda fuulka iyo baratannadii hiddo ka gaarka ahaa ee soo jireenka ka ahaa dhulkaas.

Kol lagu hilaadiyo bartamihi boqolleydii 19aad ayaa la wariyaa in Axmed Mahdi Aadan (Axmed Gindhish) uu beri u galliimay ugaaskii Murusade oo uu ka doonayey faras bayaxow ahaa oo carriga kaga tilmaannaa xarrago iyo orod labadaba.

Kol haddii sida la sheego, in muddo ah laga joogo codsigiisi ayuu Axmed Gindhish wax warcelin ah ka waayey ugaaskii Murusade, dhowrid ayuu ku raagay iyo in wixii dhankiisa u soo dhaqaaqaba uu moodo faraskii uu ka sugayey ugaaska. Wax raaga rag kuma sama'e samirkiisii ayaa gabaabsiyey, waxa uu kolkaasi dambe abwaan Gindhish mariyey geeraar uu fartiin ahaan ugu dirayey ugaaska, waxa uuna suugaan ku talmaamay astaamihii faraska iyo arrimihii uu kaga aalli waayey.

Geeraarkii Axmed Gindhish oo intaan ka dheeraa ayaan ka helay:

Dhexyarow ugaasoow
Dhaqsaalow darmaankii
Aan kaa dhowrahayey

Tilmaantiisa dhabtaa
Kol dhammeyn kari maayee

Bal aan dhool ka iftiinsho

Ama waa Xamar dhiig ah
Ama waa calas dheehan
Ama waa maydal dhoor leh
Ama waa ashkir dhaadan
Ama waa bulla dhuux ah

Dheereeyow midabkiisu
Ma dhar qaaliya baa
Dhud[8] haddii lagu weecsho
Ma doolaal la dhuftaa

Dhir hadduu ku yimaado

[8] Jeedal, suun

Ma libaax dhacay baa
Hadduu dhiillo dareemo
Ma fiin dhowrad ah baa

Haddii jeedal dhibbaano
Ma gaal dhiidhiyey baa
Orodka uu dhakabyeeyo
Ma baraar dhergay baa

Afartuu dhulka saaray
Dhaqsuhuu uga qaaday
Ma dab buu ku dhuftaa
Mise waa u dhaweeyey

Sida la wariyo, ugaaskii Murusade ayaa kolkii uu dhuuxay geeraarka waxa uu Axmed Gindhish u soo hadiyeeyey una soo jaro-hoggaanshay faraskii uu ku taamayey.

Kol haddii uu qudhiisu waa Axmed Gindhish'e ahaa maanso ruug iyo nabad goobe la xurmad dhowro waxa uu gobannimo hantiyey faraskii uu hankiisu raacay.

TIXRAAC

1. Xaaji Maxamed Axmed Liibaan (Axyaa wadani) – 1987, Somali academy of science and Arts, Muqdisho. Johnson, John William, Indiana University.
2. Cabdulle Aadan Fiidow – 1987, Somali academy of science and Arts, Ceelbuur. Johnson, john William, Indiana University.
3. Aw Jaamac Cumar Ciise – 1987, Somali academy of science and Arts, Muqdisho. Johnson, john William, Indiana University.
4. Dr. Calas Maxamed Sheekh Cabdikariin Axmed Gindhish – 2024, sooyaal haye ahna durriyaddii Axmed Gindhish, Sweden.
5. Cali sh. Axmed “Mudir” & Caadil Cusmaan Sheekh – 1985, baaris ka fog siyaasad: Axmed Mahdi “Gindhish” (1818-1905), Muqdisho.
6. Xasan Faarax Nuur – 2023, sooyaal haye, Muqdisho.
7. Keydka xarunta dhaqanka iyo suugaanta Faarax Shuuriye, 2023, Dhuusamareb.